

MA AWOODAA MASE MA AWOODO?



Waxaa la cusboonaysiiyey Agoosto 2012

Somali

Qoraalkani wuxuu faahfaahinayaa waxaad samayn karto iyo waxa aadan samany karin xilliga lagu dhawaaqay Fire Danger Periods (Mudada Khatarta Dabka), iyo maalmaha uu jiro Total Fire Ban (Reebida Dabka Gebi-ahaan), marka dabka lagu shidayo meelaha furan sharciyan la adkeeyey.

CFA waxay ugu dhawaaqdaa Fire Danger Periods (Mudada Khatarta Dabka) degma degmo bilawga xilliga hawada kululi jirto. Caqabadahaan waxaa la soo roгаа laga bilaabo 1da May ilaa laga noqdo amarka ama la bedelo. Kaymaha Dawlad Goboleedka, Baagaga Qaranka, Baaggaga Qaybaha Dawlad Goboleedka iyo dhulka dadweynaha ee xafidan, xanibaada dabka ayaa lagu soo rogayaa sanada oo dhan. La xiriir Xafiisyada DSE iyo Parks Victoria wixii talo ah oo ku saabsan xanibaada dabka ee meelahaan.

Total Fire Bans (Reebida Dabka Gebi-ahaan) waxaa ku dhawaaqa CFA maalmaha ay u badan tahay in dabku degdeg u fidi karo ayna adag tahay in la kantaroollo. Ciqaabta dabshidka sharci darada ah inta lagu jiro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka) iyo maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan) waxaa ka mid ah ganaax aad u badan iyo suurtagelida in lagu xiro.




Ma awoodaa mase ma awoodo?	Inta lagu jiro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka)	Maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan)
<p>Ma samaysan karaa baarbakiyuu, dabshid ama shidida dab la isku kululeeyo ama la isku diiriyo?</p> 	<p>HAA</p> <p>Laakiin waa haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Dabayshu aanay ku socon wax ka badan 10km saacadii; waana ✓ Dabka waxaa lagu shidaa dabshid si fiican loo dhisay ama god qodan ugu yaraan 30 sentimeter oo hoose ✓ Goob wareegeeda ilaa 3 mitir oo baarbakiyuu aanu oolayn qalab ololi kara ✓ Dabku kuma fadhiyo wareeg ka badan 1 mitir iyo inta uu le'eg yahay iyo qiyaasaha shidaalka adag oo loo isticmaalaana waa kan ugu yar oo aan looga maarmin ujeedadaan ✓ Qofku waa in uu joogaa had iyo jeer inta dabku shidan yahay uuna haystaa awooda iyo aallada lagu damiyo dabka ✓ Dabka waa in la damiyaa gebi haan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. <p>Ogsoonow sida waafaqsan xeerka CFA, in “dabshid si fiican loo dhisay” macneheeduna tahay dabshid ka samaysan dhagax, bir, shimid ama wax kasta oo aan guban karin si loo ilaaliyo agagaaraha dabdamiska.</p> <p>Kuwa ganacsi ahaan loo dhiso badanaa waxaa la filayaa in loo dhiso dabshidka ugu fiican.</p>	<p>HAA</p> <p>Baarbakiyuu ku rakiban qalabka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ uu shidayo gaasku ama korontada, kaas oo si joogto ah ugu dhegan qaabab ka dhisan dhagax, bir, shamiinto ama waxyaalla kale oo aan gubanayn oo si gaara loogu talagalay diyaarinta cuntada ✓ ama isticmaalaya keliya gaas ama koronto, kaas oo loo habeeyey ganacsi ahaan loona sameeyey cunta diyaarinta (ay ku jiraan baarbakiyuu la qaadi karo, marka la daarana si cadilan loo dhigo karo, shardise waxaa ah: <ul style="list-style-type: none"> ✓ inta u jirta 3 mitir wareega baarbakiyuu aanu oolayn qalab guban kara ✓ waa inaad haysataa tuubo ku xiran biyo ama baaldi ay ku jiraan ugu yaraan 10 litir oo degdeg loo isticmaali karo ✓ waa inuu joogaa qof masuul ah waqti walba inta dabku shidan yahay kaas oo haysta awooda lagu damin karo dabka ✓ dabka waa la damiyaa gebi ahaan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. <p>MAYA</p> <p>Dabka kaamka, dabka la isku kulayliyo ama kan dhaxanta laga dugsado waa la mamnuucay inta lagu jiro Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida dabka Gebi-ahaan). Baarbakiyuu lagu shido qoryaha ama gaaska iyo oofanada ayaa iyagana la reebay inta lagu jiro Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi ahaan).</p>
<p>Waxaan ka shaqeeya ganacsiga diyaarinta cuntada (sida quudinta), ama waxay ahay urur/ samafal/bulsho oo lacag ururineed ama urur la mid ah. Ma daari karaa dab si aan baarbakiyuu ugu sameeyo banaanka?</p> 	<p>HAA</p> <p>Laakiin waa haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Dabayshu aanay ku socon wax ka badan 10km saacadii; waana ✓ Dabka waxaa lagu shidaa dabshid si fiican loo dhisay ama meel hoos u qodan oo dhan ilaa 30 sentimitir oo hoose ✓ Goob dhan ilaa 3 mitir oo wareega aalladaha wax lagu shidayo (baarbakiyuu ama afuufid) oo aanay oolayn wax guban karaa ✓ Dabku maaha inuu yaal goob ka ballaaran 1 mitir oo isku wareega qiyaas iyo cabirka wixii wax lagu shidayona waa inay ahaadaan waxa ugu yar oo looga baahan yahay hawsha ✓ Qofku waa in uu joogaa had iyo jeer inta dabku shidan yahay uuna haystaa awooda iyo aallada lagu damiyo dabka ✓ Dabka waa in la damiyaa gebi haan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. 	<p>HAA</p> <p>Laakiin waxaa sidaas la samayn karaa keliya haddii aad haysato ogolaansho qoran oo ay bixisay CFA ama MFB aadna raacday xaalladaha ogolaanshahaan.</p> <p>Ururada bulshada, ururada samafalka ama ururo lug ku leh lacag ururinta (tusaale ahaan, dugsi ama koox cayaareed oo ku hawlan lacag ururin) ayaa laga yaabaa inay dalban karaan inay shidaan dab si ay ugu diyaariyaan cunto dad kale oo ay hawl wadaagaan. Ogolaanshahaan waxaa lagu bixiyaa – rabitaanka Xafiiska Degmada CFA ee maxaliga ah, Xarunta CFA ama Xafiisyada Soonaha MFB.</p> <p>Saraakiisha Ka-hortagga Dabka ma bixin karaan ogolaanshahaan.</p>



MA AWOODAA MASE MA AWOODO?

Waxaa la cusboonaysiiyey Agoosto 2012





Ma awoodaa mase ma awoodo?	Inta lagu jiro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka)	Maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan)
<p>Dab ma ku shidi karaa hawada furan si aan u gubo cawska, xashiishka, cagaarka, waxa hoos ka baxa ama khudaarta?</p> 	<p>HAA</p> <p>Laakiin waa haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Waxaad haysataa ogolaansho qoran oo uu bixiyey Sarkaalka Ha Hortagga Dabka oo ah hay'ad amar ka go'o, Sarkaalka Ka Hortagga Dabka ee Degmada ama Xafiiska CFA ee Degmada ✓ Inaad raacdaa shuruudaha ogolaanshaha; waana ✓ Qofku waa in uu joogaa had iyo jeer inta dabku shidan yahay uuna haystaa awooda iyo aallada lagu damiyo dabka ✓ Dabka waa in la damiyaa gebi haan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. <p>Golayaal badan ayaa mamnuuca wax gubida maalmaha laga digay ciiryaamada ama waqtiyada iyo meelaha qaarkood degmada dhexdeeda. Ka hubi Sarkaalka Ka Hortagga Dabka ee Degmada.</p>	<p>MAYA</p> <p>Dhamaan dababka meelaha furan ee gubista cawska, qashinka dhirta, baalmada ama qashinka guud waa la reebay inta lagu jiro Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan).</p> <p>Ogolaansho kasta oo ay bixiyaan Saraakiisha Ka hortagga Dabka waa la joojiyey Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi ahaan).</p>
<p>Ma ku wadi karaa gaari meelo laga yaabo inuu waxyeello miroh, caws, xashiish, cagaarka dhirta waxyeella, cagaar ama dhir kale?</p> 	<p>HAA</p> <p>Laakiin keliya haddii gaariga lagu rakibay aallada hagaagsan ee aamusinta (sida tuubada qqaca saarta) taas oo dhamaan qaaca ka soo qaada injiinka iyada oo soo marinaysa aallada aamusinta.</p> <p>Waa inaad ka fogaataa ku wadida gawaari caws qalalan, xataa haddii aanay ahayn Total Fire Ban Day (Maalinta Reebida Dabka Gebi-ahaan), khatarta uu keenay dabka kululi.</p>	<p>HAA</p> <p>Laakiin keliya haddii gaariga lagu rakibay aallada hagaagsan ee aamusinta (sida tuubada qqaca saarta) taas oo dhamaan qaaca ka soo qaada injiinka iyada oo soo marinaysa aallada aamusinta.</p> <p>Tan waa laga fogaadaa hadday suurtagal tahay, khatarta dabka oo aad u sarraysa darteed taas oo ay keeni karaan cawska qalalan iyo kulaylaha jira oo is weheshaday.</p>
<p>Ma isticmaali karaa miinshaar, dhirta ama daaqa gowsa ama kan lagu gooyo cawska guriga ama deyrka?</p> 	<p>HAA</p> <p>Miishaarta mishiinku ku rakiban yahay, kuwa lagu gaabiyo laamaha ama cawska ama lawn mower-ka ayaa laga yaabaa in loo isticmaalo cagaarka xad la'aan.</p> <p>Laakiin, isticmaalida <i>khudaar aan cagaar ahayn</i>, miishaarta wax goysa, dhirta ama cawska kan lagu yareeyo ama cagaarka lagu jaro waa waajib:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Inuu xor ka yahay cilada kharibnaan farsamo taas oo keeni karta in dab kaco iyo; ✓ Inuu ku xiran yahay kan qaraxa aamusiya ama bakhtiya; iyo ✓ Inuu leeyahay ugu yaraan 3 mitir jaha ku wareegsan oo laga ilaaliyey waxyaallaha hulca ama ololi kara, iyo <p>Intaas ka sokow, ku shaqeeyaha mishiinka, oo mar walba looga baahan yahay inuu joogo marka mishiinka la isticmaalayo, waxaa waajiba inuu haysto mid ka mid ah qalabka damiyayaasha soo socda midkood:</p> <ul style="list-style-type: none"> ➤ ugu yaraan bamka buufinta, oo shaqaynaya, oo biya ka buuxaan, oo qaadi kara biya aan ka yarayn 9 litir ➤ ugu yaraan hal dab damis (cadaadis kaydsan) oo biyo ah, oo laga buuxiyey biyo laguna dayactiray cadaadiska saxda ah, oo qaadi kara wax aan ka yarayn 9 litir. <p>Ogsoonow in damiyaha qaraxa, bamka buufinta iyo dab damiska biyaha ee kor lagu xusay ay waajib tahay in waafajiyo mustawaha Australia.</p>	<p>HAA</p> <p>Marka la gaaro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka).</p> <p>Si kasta ha ahaatee, hadday dhici karto gadaal u dhig shaqada, madaama khatarta dab bilaaban karaa ay aad u sarayso.</p>



MA AWOODAA MASE MA AWOODO?


Waxaa la cusboonaysiiyey Agoosto 2012

Ma awoodaa mase ma awoodo?	Inta lagu jiro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka)	Maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan)
<p>Ma samayn karaa si aan u fuliyo xarakaadyada ay ka midka yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> > alxamida, burburinta, dusha ka goynta, kabida, gaas ku goynta > dib u meelaynta guriga shinida > malab ka soo saarida > dayactirida khadka tareenka > kululaynta laamiga? 	<p>Laakiin waa haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Waxaa jira gaashaan u adkaysta dabka ama xijaab si loo joojiyo qaraxa, firirka kulul ee dabka ka imanaya ✓ Bed dhan ugu yaraan 1.5 mitir halka hawshu ka socoto waa in laga nadiifiyaa qalabka guban kara si looga hortago ama la qooyaa si loo joojiyo dabka fidi kara ✓ Waxaad haysataa layman biyaha keenaya ama haanta biyaha oo ugu yaraan ka qaada 9 litir ✓ Waxa soo go'a iyo waxyaallaha kulul oo ka yimaada hawsha waxaa lagu ridaa weel aan dab ka dhalanayn ✓ Qofku waa in uu joogaa had iyo jeer inta dabku shidan yahay uuna haystaa awooda iyo aallada lagu damiyo dabka ✓ Dabka waa in la damiyaa gebi haan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. 	<p>Xarakaadyada ay ka midka yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> > alxamida, burburinta, dusha ka goynta, kabida, gaas ku goynta > dib u meelaynta guriga shinida > malab ka soo saarida > dayactirida khadka tareenka > kululaynta laamiga <p>waa la mamnuucay maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi ahaan) iyada oo aan loo helin ogolaansho khaasa oo loo adeegsado maalmahaas. Kuwaas waxaa loogu yeeraa ogolaanshaha Section 40.</p> <p>Xaallada xadadan, CFA ama MFB waxaa laga yaabaa in siiyaan ogolaansho maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi ahaan):</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ ururada bulshada, ururada sadaqada, ururada lacagta ururiya ✓ hay'adaha sharciga, golayaasha ✓ warshadaha ama hawlaha ganacsiga <p>si ay shaqadooda u fuliyaan, ama ujeedo maaweelin dadweyne, ama ujeedooyin diimeed ama dhaqan.</p> <p>Ogolaanshahaan waxaa waajiba in laga hello Xafiiska Degmada ee CFA, Xarunta CFA ama xafiisyadeeda soonaha MFB, mana ay bixin karaan Saraakiisha Ka Hortagga Dabka ee Degmada.</p>
<p>Ma isticmaali karaa aallada wax lagu baabi'yo?</p> 	<p>Waase in:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Ka hubi golaha wixii ku saabsan qaanuunka maxaliga ah kaas oo laga yaabo inuu sharxayo xaalladaha ama adkaynayo ama mamnuucayo isticmaalka gubaha (sida mamnuucida maalmaha iclaaminta qaaca, meelaha qaarkood, waqtiyada qaarkood) 2. Waana in la fuliyo shuruudaha soo socda: <ul style="list-style-type: none"> ✓ In dabku ku eg yahay baabi'iyaha, waana ✓ Dabayshu waa in aanay ka badnaan 10 km saacadii ✓ 3 mitir oo kor iyo hoos ah oo wareega gubaha waa in laga baneeyaa waxyaallaha guban kara ✓ Biyoh ku filan oo lagu damiyo dabka ayaa la heli karaa had iyo jeer marka dabku shidan yahay ✓ Qofku waa in uu joogaa had iyo jeer inta dabku shidan yahay uuna haystaa awooda iyo aallada lagu damiyo dabka ✓ Dabka waa in la damiyaa gebi haan inta aan qofka masuulka ahi meesha ka tegin. 	<p>Baabi'iyaha waa la mamnuucay waqtiyada lagu jiro Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Gebi ahaan Dabka).</p>

MA AWOODAA MASE MA AWOODO?

Waxaa la cusboonaysiiyey Agoosto 2012



Ma awoodaa mase ma awoodo?	Inta lagu jiro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka)	Maalmaha Total Fire Ban Days (Maalmaha Reebida Dabka Gebi-ahaan)
<p>Ma isticmaali karaa mishiinka is-wada ee beerta, cagafcagafta, jarayaasha, ciid-qaadaha, mishiinada wax qoda ama miishiinada wadada sameeya oo ku xiran matoorka kulaylka in u jirta ilaa 9 mitir miraha, cawska, baalmada, cawska hoosaad, wixii hoos u baxa ama khudaarta?</p> 	<p>HAA Laakiin keliya haddii mishiinku:</p> <ul style="list-style-type: none"> ✓ Ka madax banaan yahay cilad iyo kharibaad farsamo taas oo keeni karta in dab kaco; iyo ✓ Waxaa lagu rakibaa joojiyaha qaraxa ama firirka si habaysan (haddii aanay ku xirnayn turbocharger ama kan hawada nadiifiya) ✓ Waxaa la qaataa qalabka damiya dabka oo ka kooban ama: <ul style="list-style-type: none"> ➤ ugu yaraan bamka buufinta, oo shaqaynaya, oo biya ka buuxaan, oo qaadi kara biya aan ka yarayn 9 litir ➤ ugu yaraan hal dab damis (cadaadis kayd-san) oo biyo ah, oo laga buuxiyey biyo laguna dayactiray cadaadiska saxda ah, oo qaadi kara wax aan ka yarayn 9 litir. <p>Ogsoonow in damiyaha qaraxa, bamka buufinta iyo dab damiska biyaha ee kor lagu xusay ay waajib tahay in waafajiyey mustawaha Australia.</p>	<p>HAA Marka la gaaro Fire Danger Period (Mudada Khatarta Dabka).</p> <p>Si kasta ha ahaatee, hadday suurtagal tahay, gadaal u dhig shaqadaan, marka khatarta in dab kaco ay aad u sarayso.</p>

Sidee u dalban karaa ogolaansho?

Waxaad kala soo bixi kartaa foomka websaytka ah cfa.vic.gov.au. waxaad kaloo la xiriiri kartaa CFA-ga maxaliga ah ee xarunta degmada waxaadna weydiin kartaa in mid boosta lagu soo dhigo. Liiska nambarda lagaala xiriirayo ee xarunta degmada ee CFA waxaa laga helli karaa websaytka, ama waxaad codsan kartaa mid adiga oo telefoon u diraya **(03) 9262 8444**.

Haddii aad u baahan tahay inaad ka shaqayso Metropolitan Fire District, waxaad la xiriiri kartaa MFB tel **(03) 9662 2311** ama mfb.vic.gov.au.

Sidee ku heli karaa macluumaadka dabka kaymaha si aan u ogaado gubista qorshaysan ee agagaarahayga?

Wac Victorian Bushfire Information Line tel **1800 240 667** ama National Relay Service (Adeega Gudbinta Qaranka) tel: **1800 555 677**.

Waxaan qorshaynayaa in aan wax ka gubo hatidayda. Sidee ugu sheegayaa adeegyada degdegta ah?

Haddii ay ku siisay ogolaanshaha gubida CFA ama Sarkaalka Municipal Fire Prevention Officer, waxaad u baahan tahay inaad siiso Emergency Services Telecommunications Authority ogeysiin ka horraysa adigoo wacaya **1800 668 511**.

Sidee dab u soo sheegaa?

Si aad u sheegto dab wac Triple Zero **(000)**.

Waxaa daabacay CFA